**QODOBBADA AY PUNTLAND KU EEDEYSAY DOWLADDA SOMALIA:**

1. DFS waxay diiday hirgalinta iyo ku dhaqanka Dastuurka Federaalka KMG ah ee rasmiga ah iyo  dib u eegis Dastuur oo sharci ah;

2. DFS waxay diiday inay dhaqangeliso Heshiiskii ay la gashay Puntland, March 11, 2013;

3. DFS waxay weecisay hadafkii la dagaalanka kooxda xagjirka ah ee Al Shabaab oo khatar wayn ku ah nabadeynta Soomaaliya;

4. DFS waxay faraha la gashay dagaal beeleedyo dhiirigalinaya haysashada sharci daradda ah ee hantida dadweynaha iyo hantida dowladda iyo deegaanada taasoo horseedaysa cadaalad darro ka dhacdagobollada Banadir, Jubbada Hoose, Shabeellaha Dhexe iyo Shabeellaha Hoose;

5. DFS waxay diiday inay la wadaagaan Dowladaha Xubinta ka ah (States) Dowladda Federaalkaawoodda siyaasadeed, kheyraadka iyo deeqaha caalamiga ah oo lagu helo magaca Soomaaliya sida deeqaha waxbarasho;

6. DFS waxay diiday inay wax ka qabato burburka dhaqaale oo ay sababtay lacagtii Shillin Soomaaliga oo suuqa ku yaraatay, iyadoo daabacaada lacag cusubi ay tahay mas'uuliyadda Dowladda Federaalka;

7. DFS waxay saxiixday heshiis amaanka xeebaha ah oo khatar ku ah madaxbanaanida Soomaaliya;

8. DFS waxay taageertaa kooxaha khalkhalgelinta oo ka qeybqaata kicinta iyo degenaansho la'aantasiyaasadeed ee deegaanada dalka Soomaaliya;

9. DFS waxay inkirtay dib u heshiisiinta qaran iyadoo diiday wax ka qabadka barakicinta iyo dib usoo  celinta hantidii la kala boobay tan iyo dagaaladii sokeeye ee bilawgii 1990s;

10. DFS waxay tarjumaad khaldan ka bixisaa dalka iyo dadka Soomaaliya goobaha caalamiga ah iyadoo ku  guuldaraysatay soo bandhigidda arrimaha qaran ee muhiimka ah.

Sidaa darteed, Dowladda Puntland waxay hakinaysaa wadashaqayntii iyo xiriirkii ay la lahayd  Dowladda Federaalka Soomaaliya, tan iyo intii ay Dowladda Federaalka:

1. Dib u soo celinayso kuna dhaqmayso Dastuurka Federaalka KMG ah ee rasmiga ah;

2. Wadatashiyo la yeelato Dowladaha Xubinta ka ah (States) Dowladda Federaalka ee arrimaha dib u eegista Dastuurka, arrimaha Federaaliga iyo arrimaha amniga Qaranka ah, arrintaasoo waafaqsan xuquuqda dastuuriga ah ee Dowladaha Xubinta ka ah (States) Dowladda Federaalka; iyo

3. Hirgalinayso nidaam lagu xaqiijiyo qeybinta deeqaha caalamiga ee lagu helo magaca Soomaaliya.

Tan iyo intii laga xallinayo arrimaha kor ku xusan, Dowladda Puntland waxay ku dhaqmaysaa xuquuqda iyo awoodaha ku xusan Dastuurka Puntland iyo Dastuurka Federaalka Soomaaliya ee rasmiga ah, Dowladda Puntland kaliya ayaa wakiil ka ah dhammaan arrimaha Puntland gudaha iyo dibedda.

**Talooyin ku socda Maamuladda Soomaalida:**

1. Taageeridda Dastuurka Federaalka KMG ah ee rasmiga ah, kaasoo xaqiijinaya hirgalinta nidaamka Federaalka iyo xaquuqda Maamullada dalka, si loo xaqiijiyo dib u midaynta Soomaaliya;

2. Taageeridda dhismaha Dowladaha Xubinta ka ah (States) Dowladda Federaalka iyadoo loo raacayo nidaam xor ah oo ku salaysan dib u heshiisiinta deegaanada, si waafaqsan Dastuurka Federaalka; iyo

3. Hirgalinta hey'adaha amniga si loola dagaalamo kooxaha xagjirka Al Shabaab iyo wixii khatar ku ah nabada iyo xasiloonidda deegaanada Soomaaliya.

**Talooyin ku socda Beesha Caalamka**

1. In la isku raaco lana cadeeyo Dastuurka Federaalka ee rasmiga ah, sida lagu xuso qoraalada iyo war saxafadeedyada ka soo baxa Beesha Caalamka;

2. In Somaaliya lagu caawiyo dib u dhiska Ciidanka Xooga Dalka oo deegaanadooda lagu dhiso si mustaqbalka loo mideeyo loona xaqiijiyo isu dheelitirka, wadashaqaynta iyo sharafta ciidanka;

3. In la xaqiijiyo qaab cadaalad ah oo isu dheelitiran oo lagu qeybiyo deeqaha caalamiga ee lagu bixiyo magaca Soomaaliya; iyo

4. In taxadar iyo faragelin deg deg lagu sameeyo barakicinta iyo cadaalad daradda lagu hayo dadka deegaanka Gobolka Shabeellaha Hoose xadgudubkaasoo ay qeyb ka tahay Dowladda Federaalka iyo maleeshiyoyiin isbiirsaday, arrintaasoo dib u abuuraysa colaado bulshada dhexdeeda ah, siinaxoojiso kooxda xagjirka Al Shabaab inay ay xoog ku yeelato deegaanada.